

Cabashooyinka – Mahadsanid

Xaashida macluumaadka ee ku qeexan xulashooyinka aad heli karto haddii aad cabasho ka qabto ficolayimud booliska ama haddii aad rabto inaad uga mahadceliso booliska ficolkooda.

Cabashooyinka

Markey tahay cabasho, waxaad kula xiriiri kartaa waaxda booliska taleefan, emayl ama warqad si aad uga codsato inaad si toos ah ula hadasho sarkaal sare si aad u dacwooto oo Aadna u hesho sharraxaad.

Waxaad sidoo kale codsan kartaa wareysi sarkaalkayaga Anshaxa & U hogaansanaata

Waxa kale oo aad ikhtiyaar u leedahay inaad warqad toos u dirto taliyaha Booliska.

Cabasho danbiyeed

Haddii aad rabto inaad soo gudbiso dacwad dambiyeed, waxaan kugu boorineynaa inaad qoraal ahaan ugu dirto:

Ministère public de l'arrondissement de Lausanne, chemin de Couvaloup 6, 1014 Lausanne.

Si looga fogaado wax kastoo keeni kara khilaaf daneed, boolisku ma qaadi doono wax talaabo sharci ah oo iyaga ka dhan ah.

Mahadsanid

Waxaad adeegsan kartaa isla hababkaas isgaarsiineed (taleefan, emayl, warqad) si aad ugu dirto mahadnaq booliska degmada Lausanne.

Police municipale de Lausanne
Rue Saint-Martin 33
Case postale 5354
1002 Lausanne

Xarunta taleefanka
+ 41 21 315 15 15

Ciwaanka emaylka
police@lausanne.ch

www.lausanne.ch/police

